

Maarso 11, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Warbixinta Kulanka Sharci-dejinta ee 2022

Kulanka Sharci-dejinta Oregon ee 2022 oo dhammaaday Maarso 4.

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) ayaa ku ayaa guul la taaban karo ka gaartay horumarinta saddex guud ahaan hay'adu mudnaanta siinayso:

- Xoojinta aasaaska adeegyada dadweynaha
- Ka jawaabista xaaladaha degdega iyo musiibooyinka
- Abuurista adeegyada dadweynaha ee mustaqbalka oo ka jira Oregon

Waad mahadsan tiihin, xubnaha shaqaalaha ah ee ODDS, ururada iskaashiga lala leeyahay iyo udoodayaasha ku dadaalay in ay shaqeeyaan saacado dheeraad ah, marqaati furay ee qaatay hawlo dheeraad ah si ay ugu doonaan nidaamka I/DD.

Halkan waxaa ku qoran waxyaabaha ugu muhiimsan saddex sharci oo saameyn la taaban karo oo wanaagsan ku yeelan doona ODDS iyo adeegyada aanu bixino.

HB 5202

Iyadoo ay dheer tahay dib u soo celinta dheelitirka codsiyadayada ee HB 5202, ODDS waxay heshay:

- Maalgelin la codsaday oo ka socota Qoondaynta Ujeedada Gaarka ah leh ee loogu talagalay Gorgortanka Shaqaalaha ee aan Ahayn Gobolka.
- Maalgelin loogu talagalay lacag bixinta dhiirigelinta ah ee la siiyo shaqaalaha u qalma ee u adeegaya macaamiisha qabta naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ee ku nool goobaha guryaha ah ee koox ahaanta loo degan yahay ee carruurta iyo dadka waaweyn.

- Maalgelin loogu talagalay lacag bixinta dhiirigelinta ah ee shaqaalaha Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka qaarkood.

SB 1545, Sharciga U Diyaarsan Mustaqbalka ee Oregon

Sharcigani wuxuu maalgelinayaa istiraatijiyada shaqaalaha oo kala duwan oo diiradda saaraya in dadka reer Oregon helaan tababarka shaqo, waxbarasho iyo ilaha loo baahan yahay si ay u galaan xirfado shaqo, oo mushahar fiican bixinaya oo buuxiya baahiyaha shaqo-bixiyayaasha ee hadda iyo mustaqbalka. Si loo caawiyo hawl-wadaagayaasha bulshada ee I/DD ee shaqadani, ODDS waxay la shaqeyn doontaa barnaamijyada iskaashiga lala leeyahay, sida barnaamijka Isku-Filnaanshaha, si loo xaqiijiyo in istiraatijiyadani ay ku jiraan:

- Taageerooyin mideeya ‘incorporate’ jawaab celinta hawl-wadaagayaasha bulshada si loo xaqiijiyo in deeqda lacageed buuxiso baahiyaha dadka qaba I/DD.
- Taageerooyin mideeya ‘incorporate’ fikradaha hawl-wadaagayaasha si loo xaqiijiyo in shaqo-bixiyayaasha lagu tilmaamay sharciga ay ku jiraan shaqaalaha I/DD.
- Tababar taageeri doona faa’iidooyinka hagayaasha si ay dadka reer Oregon ee qaba I/DD uga caawiyaan helitaanka deeqda lacageed hadba sida ay khuseyso.
- Laba boosaska shaqaalaha oo muddo xaddidan leh — oo uu maalgeliyay sharcigu — si ay gacan uga geystaan dadaaladaasi.

SB 1548

Sharcigani ay taageertay ODHS wuxuu waafaqsan yahay hadafka ODSS ee mas’uuliyada maamul iyo xaqiijinta in maalgelinta gobolku keento adeegyo tayo leh oo dadka reer Oregon ee qaba I/DD ka dhiga kuwo caafimaad iyo badbaado leh. Sharciga:

- Wuxuu xoojinayaa awooda sharci ee ODDS si ay u fuliso tallaabooyinka la xisaabtanka daryeel bixiyaha ee guud ahaan noocyada daryeel bixiyayaasha.
- Wuxuu hakinayaa shuruudaha xeerka dhismaha ee nidaamka biyaha wax lagu rusheeyo ‘sprinkler’ ee loogu talagalay Daryeelka Guriga Dadka Waayeelka ah iyo Guryaha Koox ahaanta Loo degan yahay.

- Wuxuu ansixinayaa horumarinta Agency with Choice, oo ah qaabka bixinta adeegyada guriga-dhexdiisa.
- Wuxuu bixinayaa maalgelinta lagama maarmaanka ah iyo boosas lagu taageero shaqadani.

Waad ku mahadsan tihiin mar kale taageeradiina iyo wada shaqeyn koox ahaaneed si tani looga dhigo in aydhacdo. Waxaanu ku dhisanahay guulahani ee u diyaar garowgeena kulanka 2023.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.